



Habeennada xog-iswaydaarsigu waxay ka taageeri doonaan qoysaska maaraynta maandooriyaha iyo balwadda

Isticmaalka maandooriyaha iyo balwadda ayaa ah arrimo jahwareer iyo dhib badan leh qofka la kulma iyo kuwa jecel ee daryeela qofka ay saameeyeen. Si looga caawiyo qoysaska Dugsiyada Dadweynaha Portland ardayda la tacaalaya isticmaalka maandooriyaha, waxaan martigalin doonaa Habeenkeena Xog-iswaydaarsiga Qoyska ee ugu horreeyey oo degmada oo dhan ah.

Goorta: Khamiista, Feb. 27, 6:30-8:30 p.m.

Goobta: Grant High School, 2245 NE 36th Ave.

Fiidkii waxaa ku jiri doona:

- Hay'adaha bulshada oo abaabulaya oo wadaagaya khayraadka, macluumaadka iyo istaraatiijiyadaha
- Casho iyo daryeelka carruurta
- Dood-wadaag kooxeed
- Kulamo gaar ah oo ku saabsan mawduucyo gaar ah

Tarjumaano ayaa loo heli doonaa shanta luuqadood ee ay degmadu ictiraafsan tahay - Isbaanish, Fiyatnaamiis, Shiine, Ruush iyo Soomaali.

Balwaddu waxay aad ugu dhawdahay cudurada kale, sida cudurada wadnaha; labadooduba waxay carqaladeyn karaan nolol maalmeedka, laakiin labadaba waa la daaweyn karaa lagana hortagi karaa. NIDA, Machadka Qaranka ee Isticmaalka Daroogada, ayaa ku qeexay balwadda inay tahay cudur daba-dheer, oo maskaxda ku dhaca, oo lagu garto isticmaalka soo noqnoqda in kastoo ay jiraan cawaaqib xumo. Balwaddu waxay carqaladeysaa nolosha, qoysaska, bulshada iyo waayo-aragnimada waxbarasho ee dhallinyarada.

Isticmaalka dhallinyarada, tijaabinta iyo arrimo ka khatar badan ayaa si gaar ah jahwareer u leh maxaa yeelay koritaanka maskaxda ee dhallinyarada waxaa ka mid ah isku dayidda waxyaalo cusub iyo qaadashada khatarta.

Barnaamijka 'REHL' ee Dugsiyadda Dadweynaha Portland waa hannaan qaran ahaan loo aqoonsaday oo ardayda ka caawiya inay caafimaad qabaan oo qoysaska siiya qalab ay ku caawiyaan. Si taas loo gaaro, waxaynu haysannaa [Qalabka Kahortagga iyo Taageerada ee onlaynka ah](#), oo si joogto ah wax looga baddalo oo ay ku jiraan qaybo leh khayraad gaar ah oo loogu talagalay ardayda, qoysaska iyo barayaasha.

Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan dhacdada ama qalabka, fadlan ila soo xiriir mkrogh@pps.net.

-Mary Steven-Krogh, Isuduwaha Degmada ee Taageerooyinka Daroogada & Khamriga